

Xaquuqahaaga (Your Rights)



Xaquuqahaag

Xaquuqahaag Qaybtan waxay ku siinaysaa warbixin ku saabsan xaquuqdaada haddii aad hadda ku xanaanayso, ama ay ku soo xanaanaysay local authority²⁵.

Waa masuuliyadda local authority²⁵ inay hubiso in lagu xanaaneyay inta aad ka soo maqnayd waddankaagii hooyo. Aad bay u dhici kartaa inaad taqaano wax ku saabsan Social Work Services³¹, in kastoo ay jiraan kuwo kale ee ah adeegyo local authority²⁵, kuwaasoo adiga masuul kaa ah, oo ay ku jirto Adeegyada Waxbarashada.

Akhbaarta ku jirta qaybtan waxaa sida la rajaynayo ay adiga kaa caawin doontaa meel walba oo aad uga nooshahay Scotland adigoo ah cunug ama qof dhalinyaro magangalyo doon ah. Qaybta ma daboolayso xaalad kasta oo ay dhici karto inaad gasho, mana ay ka jawaabi karto dhammaan su'aalaha ay dhici karto inaad qabto ee ku saabsan xaquuqahaaga ama walaacyada arrintan khuseeya, laakiin waxaa ku jira lambaro telefoon ee lala xiriiri karo qaybta **Tusaha cinwaanada** ee tusahan kuwaasoo ay dhici karto inay adiga ku anfacaan.



Haddii aad noqoto mid ladaryeelo oo hooy la siiyey, waa inaad heshaa nuqul Xuquuqa, Ixtiraamka iyo Masuuliyada kaaga timid Waaxda Xuquuqda Caruurta, ee kuu s heegaysa in badanaa ku saabsan xuquuqdaada. Haddii aad tahey ilmo la nool waalidka wax korsada amase aad ku nooshahay daryeel bad qaba, sidoo kale waa inaad heshaa warbixin qoraala.



Adeega Xaquuqaha Caruurta [The Children's Rights Service (Glasgow)]

ee Glasgow, adeega xaquuqaha caruurta waxa uu diyaar u yahay qof kasto oo dhalinyaro ah ee ay xanaaneeyaan Glasgow City Council Social Work Services:

- > Qaybta caruurta/dadka dhalinyarada ama dugsiyada la dego;
- > Ee qayb ammaan ah ama;
- > Kuwa la jooga dadka ama bulshada sida waalidka oo kale ah, ama guriga hoos yimaada amarka ka yimaada Children's Panel.

Adeega waxuu:

- > Ku siin karaa akhbaar ku saabsan xaquuqahaag waxuuna kugu xiri karaa dad kale oo ku siin kara caawimaad iyo talo;
- > Kaa caawin karaa inaad warbixin qorto ama uu adiga ku raaco si dib loogu eego/dhagaysiga cunuga;
- > Kuu ogolaadaa inaad ogaato waxaad awoodo inaad ka fisho Social Work Services³¹ iyo dad kale ee ku taxaluqa xanaanadaada;
- > Kaa caawin karaa inaad ka cabato waxa aadan ku faraxsanayn;
- > Hubin karaa waxa ay tahay inaad tiraahdo in la dhagaysto;
- > Kaa caawin karaa inaad soo bandhigto fikaradahaaga ee adeegyada caruurta iyo dadka dhalinyarada ee ku saabsan waxa aad u malayso inay hagaagsan yihiin iyo waxa u baahan in wax laga badalo iyo;
- > In adiga lagu dhagaysto waxa aad tiraahdana in si adag loo dhagaysto.

Eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan waxii xiriirada ah oo faahfaahsan.



Maxay ka macno tahay haddii lagu xanaaneeyay?

Haddii lagu xanaaneeyay waxay la macno tahay in sabab darteed aadan ugu noolaan karin guriga oo markaas social Work Services³¹ iyo waaxyo kale ee isla gudaha local authority²⁵ ay masuul adiga kaa yihiin. Waxay iyaga:

- > hubin doonaan in si fiican lagaaga taxdaray;
- > la ilaaliyay adiga welfare³⁴;
- > inay ku siiyaan talo iyo taageero;
- > ku dhagaystaan ayna xisaabta ku darsadaan fikradahaaga markay qorshaynayaan mustaqbalkaaga; iyo
- > inay xisaabta ku darsadaan baahiyaha diintaada iyo dhaqankaaga.

Waa inaad lahaataa doorasho iyo cod ee nooca meesha ee adiga ku fiican inaad ku noolaato. Waa inaad xasuusataa fikradahaaga iyo dareemadaada ee ku noolaanshaha meel ay tahay mid aad muhiim u ah.

Waxay qaadan kartaa waqti si aad u hesho nooca ugu fiican ee meel aad ku noolaato maadaama ay jiraan dad badan oo u baahan meelayn oo ka badan meelaha diyaarka ah.

Xaquuqahaaga 01

Xaquuqahaaga waa waxa aad filayso inaad hesho ama ay dhacaan. Masuuliyadahaaga waa waxa ay dadka kale adiga kaa filayaan.

Dadka sida waalidka oo kale ah [Foster parent(s)] ama guryaha dadka lagu hayo (residential care)?



La noolaanshaha foster parent(s)¹⁶ waxay la macno tahay la noolaansho qoys ama qof wayn oo ku taageeraya, ku noolaanshaha residential unit²⁹ waxay la macno tahay la noolaanshaha tiro caruur kale ah ama dad dhalinyaro ah, uu qof shaqaale ahna uu idin taageerayo. Haddii aad fikirado kaqabto arrintan, adiga u sheeg social worker³⁰ si uu/ay ogaado/ogaato sababta aad u dareemayso fikradaas gaarka ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad waydiisato inaad meel kale kula noolaato qofkii aad doonto ee ka mid ah walaalaha kuwaasoo iyagana meel keel lagu xanaaneeyo. Iyagana cod bay ku yeelan doonaan haddii ay rabaan ama aysan rabin arrintan iyada ah, marka ay suurtoogalka tahay, Social Work Services³¹ waa inay isku dayaan oo ay meel wada dejiyaan dadka walaalaha ah. Meel walba oo aad ku nooshahay waa inaad fishaa in si wanaagsan laguula macaamiloodo.

Ka yeelida inay naftaada wax fahantay

Haddii aadan fahmin ama aadan waxba ka garanayn waxa lagugu yiri kulamadaadii waxaad waydiisan kartaa qof ah interpreter²² kaasoo luqadaada ku hadla inuu meesha joogo.

Xaquuqdaada inaad cod leedahay

Waxaad xaq u leedahay inaad soo jeediso fikiradahaaga – si aad u sheegto waxa ay kula tahay ama dareemayso. Fikradahaaga ku saabsan in lagu xananeeyo iyo waxa aad doonayso aad bay muhiim u yihiin waana in xisaabta lagu darsadaa marka go'aan laga samaynayo wax ku saabsan adig iyo mustaqbalkaaga.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Dhamaan go'aanada adiga ku saamaynaya waa in si taxadar leh loo gaaraa waana inay ahaadaan waxa ugu fiican ee dantaada. Tani macnaheeda ma ahan in dadka adiga kula shaqaynaya ay mar walba kugu raacayaan waxa aad rabto maadaama ay dhici karto inay u malaynin inay tahay wax kugu fiican adiga. haddii aadan ku raacin wax go'aan ah sababaha arrintaas keentay waa in lagu sharxaa adiga waxaadna xaq u leedahaya inaad ka cabato ama racfaan ka qaadato appeal'.

Aad bay muhiim u tahay inaad tiraahdo waxa ay kula tahay marka kulan kast lagu jiro halkaasoo go'aano lagu samaynayo ee xanaanadaada iyo mustaqbalkaaga. Tiro badan oo caruur ama dhalinyaro ah waxay u arkaan dhib inay ka hadlaan kulamadan marka haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad arrintan isugu diyaariso waxaad waydiin kartaa qof. Qofkani waxuu noqon karaa key worker²³ ama qof madax bannaan ee ay shaqadiidu tahay inuu caawiyo ama matalo caruur iyo dad dhalinyaro ah. Inta ka horaysa kulanka waa in lagu waydiiyaa cidda aad rabto inay meesha joogto. Haddii aad dareento in kulanka ay imaanayaan dad badan isla markaana aadan dareemayn inaad qanacsan tahay waa arrin aad sheegi kartid.

Waa in lagu siiyaa nuqul warbixinta social worker's³⁰ waxayna tahay muhiim inaad akhriso warbixinadan inta ka horaysa kulanada. Haddii aad door bidayso in warbixinta lagu sharxo ama akhriyo adiga, waad waysiisan kartaa qofka ku taageeraya inuu arrintan kaa caawiyo.

Xasuuso waad diyaarin kartaa akhbaartaada marka aad kulan aadayso waadna waydiisan kartaa inuu qof arrintan kaa caawiyo. Haddii mar lagu sheegay inaad imaan karin kulan dib u eegis ama aad tahay mid aan ku faraxsanayn go'aano ama qorshayaal, waxaad la xiriiri kartaa Children's Rights Service ama waxaad ka heli kartaa la-talin sharci oo lacag la'aan ah Scottish Child Law Centre.

Eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan waxii xiriirada ah oo faahfaahsan.



Xaquuqahaaga 02

Qaar ka mid ah xaquuqahaaga waxa ay ku qoran yihiin sharciga – kuwani waa xaquuqaha sharciga ah ee aad leedahay.

Kulanadaada

Waxaa jiri doona kulano joogto ah inta lagu xanaanaynayo. Waxay u muuqan karaan kuwo si farogelin u ah, laga qajilo, laga baqo ama caajiso, laakiin waa hab muhiim ah ee lagu hubiyo in qof walba oo og yahay waxa socda iyo waxa iyaga laga filayo.

Sida caadiga ah waa lagugu soo casuumi doonaa dhammaan kulanada aad bayna muhiim u tahay inaad isku daydo inaad tagto si markaas aad ugu sheegto dadka ku taageeraya adiga waxa aad doonayso inay dhacaan.

Waxaa jira seddex nooc oo kulamo waawayn ah:

1. Kulamada Qorshayntaadsa (Your Planning Meetings)

Marka aad u guurto meel cusub oo aad ku noolaanayso waxaa jiri doona kulan si loo ogaado waxa loo baahan yahay in la sameeyo isla markiiba. Kulamadan waa in la qabta wax ka yar todobo maalmood haddii ay suurtoagal tahay inta aadan soo guurin. Haddii aysan sidan suurrobin waa in la qabtaa waxaan dhaafsiisnayn seddex maalmood kadib marka aad so guurto. Waa muhiim inaad hesho kulanka qorshaynta si dadka ugu muhiimsan ee ku taxaluqa taageeridaada ay u yimaadaan si ay uga hadlaan arrimaha.

2. Child Care Reviews

Child Care Reviews waa kulamo eega adiga horumarkaaga. Dhammaan caruurta ay xanaaneeyaan Social Work Services³¹ waxay helaan kulano joogto ah ee Child Care Reviews.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Kulanka ugu horeeya ee eegitaanka horumarkaaga waxaa la qaban doonaa lix usbuuc kadib kolka aad u soo guurto meesha cusub, kadib seddex bilood haddana lix bilood.

Xasuuso, adiga ama qofkaaga social worker³⁰ waa uu codsan karaa kulan eegitaan ee hore; ma aha inaad sugto lix bilood.

Child Care Reviews waxaa loo qabtaa si looga xaajoodo qorshahaaga xanaanada (eeg bogga 48) iyo horumarka lala sameeyay iyo sida loo qorsheeyay mustaqbalkaaga – tani waxaa dhici karta inay noqoto bilaha soo socda ama ka shise. Kulamada eegitaanka waxaa loo qabtaa si loo hubiyo inaad faraxsan tahay aadna helayso xanaanadii aad u baahnayd. Child Care Reviews waxaa qabanqaabiya qofkaaga social worker³⁰ inta badanna adiga waad ku taxaluqi doontaa, qofkaaga social worker³⁰ iyo qofkiisa/qofkeeda Practice Team Leader iyo qof ka shaqeeya meesha aad deggan tahay iyo maamulaha qaybta. Dad kale ayaa dhici karta in la waydiisto inay yimaadaan qayb ka mid ah kulanka, sida macallinkaaga hagitaanka (guidance teacher), dhakhtarkaaga, iyo Children's Rights Service. Waa muhiim in fikradahaaga dadka imaanaya xisaabta lagu darsadey.

Haddii aad u malaynayso inaad niyad jabayso kulanadan eegitaanka uma baahnid inaad tagto. Haddii ay noqotay inay dhib kugu tahay inaad ka hadasho kulamada eegitaanka waxaad codsan kartaa caawimaad si aad u hoary ugu qorto warbixin ku saabsan nafsadaada.

Xasuuso, fikradahaag waa muhiim waana in uu dhagaystaa qof walba oo jooga kulanka eegitaanka. Waxaad ka codsan kartaa qofka adiga ku caawiya inuu kuu diyaariyo kulanka kaalana shaqeeyo waxa aad u baahan tahay inaad tiraahdo.



3. Shirarka Kiiska (Case Conferences)

Shirka kiiska waxaa la qabtaa haddii loo maleeyo in dhibaato lagu gaystay ama aad khatar u tahay in lagu dhibaateeyo. Kulankan isaga ah waxa uu keeni karaa in magacaaga la geliyo diiwaanka Child Protection Register⁸. Qorshe lagu ilaalinayo baa xitaa dhici karta in la qoro si lagaaga dhigo mid ammaan ah. Boliiska iyo qofkaaga social worker³⁰ ayaa inta badan jooga kulamadan. Waad imaan kartaa shirka kiiskaaga haddii aad u aragto inay fiican tahay inaad halkaas joogto aysanna kugu ahayn mid aad kuu niyad jebinaysa.

Waxyaalaha ugu muhiimsan ee kulamadaada

Qof aad aaminsan tahay ayaa kaa taageeri doona kulamadan. Kani waxuu noqn karaa qof ay shaqadiisu tahay inuu hubiyo in fikaradaha caruurta iyo dadka dhalinyarada ah ay ahadaan kuwo la maqlay, tusaale ahaan Children's Rights Service ama Who Cares? (Scotland). Xasuuso dadka adiga ku taageeraya waxay kuu diyaarin karaan qof ah interpreter²² inuu kula joogo dhammaan kulanadaas.

Dhammaan go'aanada adiga lagaa sameeyay waa la qori doonaa waxaa lagu siin doonaa nuqul qoraalkaas ah. Haddii aadan ku raacsanayn go'aan waxaad codsan kartaa in lagu qoro faylkaaga file¹⁵. Waxaad sidoo kale ka samayn kartaa cabasho arrintan waana la baari doonaa.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan waxii xiriirada ah oo faahfaahsan.



Xulashhoyinkaaga (Your choices)

Waxaad u leedahay xaq inaad xulasho ka samayso arrimo fara badan. Waa in lagu siiyaa akhbaarta aad u baahan tahay si lagaaga caawiyo inaad xulato waxa aad u baahan tahay, iyo waxa adiga kuu fiican. Tan waxaa ku jira fikradahaaga marka go'aan ku saabsan meesha ugu fiican ee aad ku noolaan karto la samynayo.

Haddii aad ku jirto qaybta degenaanshaha residential unit²⁹ waa inaad leedahay cod, ay wehliyaan codadka caruurta iyo dadka dhalinyarada kale ah, ee ku saabsan sida ay wax u muuqdaan; taasoo ay ku jirto midabada, qurxinta, alaabta guriga, iwm. Tani ma noqon karto wax mar walba suurto geli kara – tusaale ahaan haddii uu degaankaagu yahay mid ku meel gaar ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad xulasho ka samayso dharkaaga, sida ay kaaga baxayso lacagtaada pocket money²⁶ iyo xaraakaadyada aad ka qayb qaadanayso. Qofkaaga key worker²³ ama dadka kale ee ku taageeraya adiga waxaa saaran masuuliyad ay kugu ilaaliyaan wayna kaala hadli doonaan waxii fal ah ee ay u maleeyaan inuu adiga dhib kugu yahay. Tusaale ahaan, haddii aad habeen soo daahdo ama dhexdo adigoo aanan qofna u sheegin inaad ammaan tahay waa ay welweli doonaan.

Xaquuqdaada aad kula xiriiri kartid dadka adiga muhiimka kuu ah (Your right to contact with the people important to you)

Waxaa dhici karta inaad leedahay walaali wiilal iyo gabdho ah kuwaasoo iyagana la xanaaneeyo waana laguugu dhiirigelinayaa inaad xiriir iyaga la leedahay. Waxaa xitaa dhici karta inaad ogaato qaraabo ama saaxiib qoyskaaga ee isna ku nool gudaha Glasgow kaasoo aad jeceshahay inaad la xiriirto. Haddii aad jeceshahay inaad la xiriirto iyaga, qofkaaga social worker³⁰ waa ay dhici kartaa inuu kaa caawiyo arrintan.

Mararka qaarkood ma aha danataada ugu fiican inaad xiriir la leedahay xubin ka mid ah qoyskaaga ama saaxiib marka qofka adiga ku taageeraya ayaa kuu sharxi doona go'aankan.

Eeg sidoo kele bogga 37 akhbaar dheeraad ah ee sidii aad ku heli lahayd xubanah qoyskaaga.

Qorshahaaga xanaanaynta (Your care plan)

Qof walba ee dhalinyar ee la xanaaneeyo waa inuu haystaa qorshe qoran ee ku saabsan meesha uu degi doona iyo qofka samayn doona waxaas si loo hubiyo in si fiican loo xanaaneeyay. Tan ayaa la yiraahdaa “qorshe xanaanayn”. Waa inay ka mid ahaadaan rajooyinkaaga iyo qorsheyaashaada mustaqbalka, ama waxa qof walba, oo aad adiga ku jirto, ay tahay inuu sameeyo si loo hubiyo in uu qorshaha shaqeeyo. Waad inaad ku taxaluqdaa qoritaanka qorshaha xanaanaynta waana inaad heshaa nuqul marka la qoro.

Waqigaaga qof-ka-qofka (Your one-to-one time)

Waxaad xaq u leedahay waqtiga qof-ka-qofka ee qof walba oo adiga ku taageeraya waana in lagu siiyaa waqti aad uga hadashoo wax walba oo aad rabto ee adiga ku welwel gelinaya. Waa in lagu siiyaa waqti labadiinaba u fiicansi aad keligiin u wada hadashaan qofka adiga ku taageerayana waa inuu kuu sheega sida badan ee aad u samayn karto kulanadan.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qof social worker³⁰ aadna u aragto si joogto ah; sida ay inta badan u dhici karto waa inaad adiga qofkaaga social worker³⁰ ka wada heshiisaan. Waad codsan kartaa inaad aragto qofkaaga social worker³⁰ in badan haddii ay dhibaatooyin ku haystaan. Waa inaad mar walba ogtahay waqtiga aad arkayso qofkaaga social worker³⁰ mar kale.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Waa maxay social worker?

A social worker³⁰ waa qof u tababaran inuu bixyo talo, hagitaan, iyo taageero qoysaska, caruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Waxaa inta badan shaqaaleeya local authority²⁵.

Wac qofkaagar social worker³⁰ haddii aad u baahato si aad ula hadasho isaga/iyada inta u dhaxaysa waqtiyada booqashada. Tan waxaa laga samayn karaa meesha aad deggen tahay. (M aha inaad wax u bixiso arrintan). Ma aha inay sidaas noqoto maxaa yeelay waxbaa si u qaldamay. Waxaa dhici karta inaad hayso war fiican oo aad rabto inaad la qaybsato ama waxaa dhici karta inaad rabto inaad iskala hadasho.

Haddi aad la nooshahay foster parents¹⁶ waa inaad u heshaa waqti aad keligaa iyaga la joogtid si aad ugala sheekaysato arrimo shakhsiyadeed isla markaana aad la xaliso arrimo adiga muhiim kuu ah. Haddii aad deggan tahay gudaha residential unit²⁹ waxaad lahaanaysaa qof ah key worker²³ qofkanna waxaa saaran masuuliyad gaar ah si uu adiga kuula shaqeeyo.

Dadka adiga ku taageeraya (The people supporting you)

Eeg shaxda gadaasha xirmadan taasoo ku tusaysa dhammaan dadka adiga ku taageeraya.

Haddii aad ku jirto xaalad dhib baadan waxaad codsan kartaa inaad la qadato waqti dheer qofkaaga social worker³⁰ ama key worker²³ laakiin waxaa dhici karta in mararka qaar ay mashquul yihiin marka isku day inaad fahanto samirna aad u yeelato illaa iyo ay ku arkayaan.

The People
Supporting
You



Haddii aadan la hadli karin qofkaaga social worker³⁰ ama key worker²³ isla markaana aad dareentay in arrintan aynan soo fiicnaanayn waxaad codsan kartaa in lagaa bedelo. Haddii aadan is fahmin dadkaaga foster parent(s)¹⁶ aadna dareento inaysan marna ka soo fiicnaanayn waxaad codsan kartaa in lagaa bedelo meesha aad ku nooshahay.

Haddii aad codsato isbedel shaqaale ama meesha aad ku nooshahay waxaa lagaa filayaa ninaad siiso xiriirka qofkaas isku day fiican maadaama ay qaadato waqti si aad qof u barato una dareento inaad aamini kartid isaga/iyada. Haddii aadan ku farxsanayn habka laguula macaamilooday ama lagu xanaaneeyay, waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato arrintan si sir ah oo xafidan.

Eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan waxii xiriirada ah oo faahfaahsan.



Waxbarashadaada (Your education)

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho waxbarasho waxaana ku saaran masuuliyad inaad dugsu dhigato ugu yaraan inta aad ka gaarayso 16 sano jir. Dadka adiga ku taageeraya aad bay u xiisaynayaan sida aad dugsi ula qabsanayso waxayna kaa caawin doonaan haddii ay wax dhibaato ah kaa qabsadaan dugsi. Haddii aad qabto baahiyaha taageero waxbarasho, tusaale ahaan Ingiriis ma aha luqadaada koowaad, Education Services¹² waa inay ku siiyaan taageero dheeraad ah. Dugisyada qaar waxa ay leeyihiin qaybo taageera laba-aflayda (bilingual) dadka dhalinyarada ahna waa ay tegi karaan wax yar kadib marka ay waddanka yimaadaan.

Haddii aad u baahan tahay waqti badan ood ku barato luuqada ingiriisida markaad timaado, waxaad awoodi doontaa inaad iska xaadiriso qaybaha luuqadaha dhawrkaa.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Kala xaajood arrintan qofkaaga social worker³⁰ hubina in la og yahay fikirkaaga inta aanan go'aanka la gaarin.

Ma aha inaad dugsiga ka tagto marka aad 16 sano gaarto. Kala hadal fursadaha aad haysato. Fursadahan waxaa ku jira inaad dugsiga sii wadan karto, inaad kulliyad aadi karto, shaqo tabarucaad ah samayn karto, tababar ama shaqo raadsan karto (haddii sharcigaaga socdaalka uu kuu ogolaanayo inaad shaqayn karto).

Social Work Services³¹ iyo/ama Education Services¹² waxaa saaran masuuliyad inay ku caawiyaan dhaqaale ahaan haddii lagu xanaanaynayo meelna lagu dejiyay muddo gaar ah ee ka horaysa inta aad ka gaarayso dhalashaada 16 aad.

Caafimaadkaaga (Your health)

Caafimaadkaaga aad buu muhiim u yahay waxaana aad xaq u leedahay adeega ugu fiican ee suurto geli kara. Waxaad xaq u leedahay inaad aragto haddii jiraan welwel caafimaad oo aad qabto. Xasuuso haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u fahanto arrintan waxaad taageero waydiisan kartaa qof aad rumaysan tahay waxaana aad codsan kartaa qof ah interpreter²².

Haddii aad noqoto mid ladar yeelo oo hooy lasiiyey, kalkaaliye caafimaad oo ka socota Kooxda Caafimaadka Guryo siinta iyo Daryeelaka ayaa kula kulmaya si ay uga hadlaan baahida caafimaadkaaga una dhammaystiraan qiimeynta caafimaadkaaga guud. Haddii aad u baahan tahay wax talo ah ama taageero ah la xidhiidha caafimaadkaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa kalkaaliyaha caafimaadka iyadoo lagu daryeelayo markaad daryeelka ka tagto.

Waxaad xaq u leedahay inaad ogolaato ama diiddo daawayn caafimaad, da' walba oo aad tahay, inta uu dhakhtarku rumaysan yahay inaad tahay qof awood buuxa leh inuu fahmo waxa ku taxalaqu daawaynta lagu soo bandhiagay, ama natiijooyinka soo bixi kara, xitaa haddii aad 16 sano ka yar tahay. Uma baahnid inuu qof wayn uu kuu aqbalo daawaynta haddii uu dhakhtarka rumaysan yahay inaad si fiican u fahantay arrimaha inkastoo ay fiican tahay inaad qabto qof wayn oo ku taageeraya si uu kuu caawiyo inaad samayso xulashooyin aad fahansan tahay.

Xaquuqaahaaga (Your Rights) 03

Waxaad xaq u leedahay in lagu daweeyo si ay qadarin ku jirto adna waa inaad leedahay masuuliyada aad ku qadariso xaquuqaaha dadka kale.



Xanaanaynta nafsadaada (Looking after yourself)

Waxaad xaq u leedahay inaad si fiican u xanaanayso jirkaaga waxaana tan ka mid ah:

- > inaad si fiican ugu nooshahay meel ammaan ah;
- > aad haysato alaab taageeraysa baahiyaha dhaqankaaga iyo diintaada tusaale ahaan raashinka aad jeceshahay iyo alaabta timaha ee kaa dhigaysa mid wanaag ka dareema nafsadiisa; iyo
- > in lagu siiyay xulasho waxa aad xiranayso ama aad iibsanaayso dharkaaga.

Masuuliyadahaaga waa:

- > inaad ka taxadarto guriga, alaabta iyo waxyaalaha aad adiga leedahay. Haddii aad guriga dhaawacdo waxa ay saamaynaysaa dadka kale waxaana lagaa filayaa inaad bixiso waxii kharash ah ee ku baxa waxii dhibaato ah ee aad si ula kac u gaysao; iyo
- > marka aad hesho lacag dhar ku iibsi loogu talo galay lagaama filayo inaad soo gadato kuwa ugu qaalisan – waa inaad barataa sidii aad lacagta ugu kala qorshayn lahayd budget⁴ dhamaan waxyaalaha aad u baahan tahay hana ku bixin lacagtaada oo idil hal shay.

Ammaankaaga (Your safety)

Waxaad xaq u leedahay inaad dareento ammaan inta lagu xanaanaynayo.

Waxaa kaloo ku saaran masuuliyad aad ku qadarinayso xaquuqaha dadka kale si ay u dareemaan ammaan hana cabsigelin ama dhaawacin dadka kale. Haddii aad dhaawacdo ama cabsigeliso qof kale, ama ay tan adiga kugu dhacdo, qofka adiga ku taageeraya waa inuu soo dhexgalaa.

Haddii qof dabeecadiis ay ku cabsigelinayso waxaa lama huraan noqon karta in lagaala xaajoodo ina lagu raro meel kale ee la dego.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Wac ChildLine 0800 1111

Qofna xaq uma laha inuu ku dhaawaco ama cabsigeliyo. Haddii lagu cabsigeliyay isku day inaad la hadasho qof wayn oo aad aaminsan tahay ama waxaad waci kartaa lambarkan ChildLine Tel 0800 1111. Kani waa lambar lacag la'aan ah ee caruurta rabta inay si kalsooni leh kala hadlaan qof wax ku saabsan dhibaatooyin haysta. Mararka qaar ka hadlidda xaalada oo keliya ayaa ku caawin karta laakiin ChildLine waxuu sidoo kale uu awoodaa inuu ku siiyo talo waxa aad samayn lahayd.

Arrihaaga gaarka ah iyo sirtaada (Your privacy and confidentiality)

Waxaad xaq u leedahay in ay arrimahaaga ay gaar kuu ahaadaan. Waa inaad awoodaa inaad samayn karto ama heli karto telefoonadaada si adiga gaar kuu ah. Waxaa jira telefoono aad dirsan karto oo ay kharashka kaa bixinayaan adeegyada Social Work Services³¹, oo aad u dirayso dadka adiga muhiimka kuu ah, tusaale ahaan qofkaaga legal representative²⁴ ama qofkaaga social worker³⁰. Waxaa kaloo jira telefoono aad dirto oo aad adiga iska bixinayso. Waxad kaloo xaq u leedahay inaad dirto ama hesho waraaqahaaga si gaar ah. Waraaqahaaga ma la furi karo akhrinna karo ama la faafreebi karo censored⁷.

Laakiin, haddii dadka ku taageeraya ay rumaysan yihiin inaad heshay waraaq ama telefoon laga yaabo inuu dhib kuu leeyahay waxaa waajib ka saaran inay ku ilaaliyaan adiga. Tani waxay xaddidi kartaa waxaagii gaarka ahaa waxayna ku taxaluqi karaan jebinta confidentiality⁹.

KEEP OUT



Akhbaarta shakhsiga ah ee adiga kugu saabsan lama siin karo dad kale oo aan u baahnayn inay ogaadaan. Tan waxaa ka mid ah caruurta iyo dadka dhalinayarada ee isla meesha adiga kugula nool. Dadka adiga ku taageeraya way dhici kartaa in la siiyo akhbaar sidaa darteed waxay ahaanayaan kuwo la socdo haddii ay jirto dhibaato ku haysata.

Qaybaha la deggan yahay, meelaynta foster iyo supported accommodation³² waa inaad awooda inaad leedahay qolkaaga laguna siiyaa fure aad irridaada bannaanka uga xirato. Halka aysan suurtoogalka ahayn waa inaad haysataa armaajo ama kabiin (cabinet) sariirta dhinaceeda yaala ee aad xiran karto si aad ugu xafidato waxyaalaha aad leedahay.

Qofka adiga ku taageeraya uma baahna inay qolkaaga soo galaan, iyagoo aan ogolaansho kaa haysan, haddii ay rumaysan yihiin in caafimaadkaaga iyo amaankaaga ay khatar ku jiraan. Waa inaad qadarisaa arrimaha gaarka ah ee dadka kale hana aadin qololkooda adigoo aan waydiihin.

Xaquuqahaag (Your Rights) 04

Ma aha in lagu faquuqu (discriminated) iyadoo loo sababaynayo waddanka aad aslaagii ka timid, galmadaada, diintaada, midabkaaga, ama curyaan baad tahay ama sabab kale.

Helitaanka akhbaarta shakhsiga ah iyo diiwaanadaad (Accessing your personal information and records)

Waxaad u leedahay xaq akhbaartaada ku saabsan waxyaalaha adiga ku saameeya ama lagu sheegay ee ku saabsan dhammaan waxyaalaha adiga ku saameeya. Waxaad kaloo aad xaq u leedahay inaad hesho akhbaarta qoran si aad adiga fahmi karto.

Haddii aad ka wayn tahay 16 sano waxaad u leedahay xaq sharci inaad aragto file¹⁵. Qofkaaga social worker³⁰ waa inuu kaa caawiyaa codsiga.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Waad arki kartaa faylkaaga file¹⁵ haddii aad ka yar tahay 16 sano, in kastoo ay fiican tahay haddii uu qof kula kula dulmaro adiga file¹⁵. Waxaad u leedahay xaq in lagu calaamadeeyo meel walba oo aadan ku raacin ee faylkaaga.



Laguuma ogolaanayo inaad aragto akhbaar ku saabsan dad kale ama ay dad kale bixiyeen aan ha ahayn haddii ay kuu ogolaadaan.

Haddii qofka kale ee ku taageeraya adiga, ee aan ahayn social worker³⁰ uu waydiisto faylkaaga waa in lagaa waydiiyaa fikirkaaga arrintan.

Horay u socosho (Moving on)

Dadka dhalinyarada waxaa dhici karta inay u fekeraan in local authority²⁵ aysan ahayn inay xanaanayso markay 16 sano gaaraan laakii local authority²⁵ waa inuu ku siiyaa taageero adiga haddii aad weli ka yar tahay 18 sano jir. Marka aad jirto 15 sano qofkaaaga social worker³⁰ ama qofka ku taageeraya adiga waa inaad kala hadashaa wax ku saabsan qorshaha 'Pathway Plan'.

Qorshaha Pathway Waxaa ka mid ah inaad kala xaajootid meesha aad ku noolaanasyo marka aysan jirin in lagu sii xanaanaynayo iyo noocyada taageero ee aad u bahaan karto. Dad kala duwan ee adiga ku taageeraya ayaa ku taxaluqi kara qiimayntaada iyo qorshayntaada, sida careers adviser⁵, key worker²³ iyo social worker³⁰. Waa muhiim in fikradahaaga in lagu darsado xisaabta inta ugu badan ee ka suurto geli karta marka la qorshaynayo mustaqbalkaaga. Haddii aad rabto inaad wax dheeraad ah ka ogaato ee ku saabsan qorshaha Pathway waxaad kala hadli kartaa qofkii aad doonto dadka ku taageeraya.

Social Work Services³¹ waxuu ku siin karaa taageero iyo caawimaad dhaqaale, ficil (practical) iyo dareen. Haddii lagu xanaanaynayo marka aad gaartay da'dii dugsiga loo dhamayneyey, Social Work Services³¹ baa ku caawin kara inta aad ka gaarayso dhalashadaada 21aad. Haddii aanan lagu xaanaynayn marka aa gaarto da'dii dugsiga lagu dhamaynayey Social Work Services³¹ baa weli ku siin kara caawimaad.

Marka aad gaarto da'da dugsiga lagu dhamaynayey waxaa lagaa filayaa inaad masuuliyad dheeraad ah u qaado nafsadaada aadna si dheeraad ah ugu taxaluqdo xanaanada nafsadaada. Tani waxaa ku jiri doona sii wadashada waxbarashada ama isku dayida helitaan shaqo ama tababar, inaad barato sida raashinkaaga loo karsado iyo sida loo samaynkaro. Haddii aad u dhaqanto si masuuliyad leh waxaa lagu siinayaa xorriyad dheeraad ah waxaana laguula macaamiloon doonaa sioo qof wayn. Waxaa mar walba lagaa filayaa inaad qadariso xaquuqaha dadka kale.

Marka aad biloowdo shaqo waxaa lagaa filayaa inaad bixiso kharshyada nolashaada. Marka aad diyaarka u tahay inaad ka gurto deegaankaaga, tani waa in la qorsheeyaa waxaana lagu siin doonaa taageero si aad u hesho meel kugu habboon ee aad ku noolaato. Waxaad la xiriiri kartaa qaybtaada residential unit²⁹ marka aad gurto.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh



Xeerarka meesha aad ku nooshahay (Rules for the place that you live)

Xeerar asaasiga ayaa la dejiyaa marka waxaa la filayaa inaad garanayso waxa ay dadka kale kaa filayaan adiga. Xeerarkan waxay khuseeyaan qof walba oo ay ku jiraan dadka adiga ku taageeraya waana in lagu qoraa oo lagu siiyo adiga. Meel walba oo aad ku nooshahay waxay leedahay xeerar hoose waxaadna waydiin kartaa qof inuu kuu sharxo adiga.

Sida guud waxaa jiraya xeerar ku saabsan:

- > ula macaamiloonka daka kale iyadoo ay qadarin ku jirto, taasoo ay ka mid tahay inaad qof waxba ku dhufanayn ama u dhaaranayn/isticmaalayn hadalo cay ah;
- > waqti aad habeenkii guriga imaanayso;
- > saacadaha hurdada;
- > waqtiga sbaxii la soo kacayo;
- > aadista dugsiya;
- > khamriga iyo daroogad: laguuma ogolaanayo inaad haysato ama isticmaashoyo iyaga;
- > cabista sigaarka: Social Work Services³¹ waxaa ka saaran masuuliyad inuu daka dhalinyarada ah kala dagaalamo sigaar cabista waana inuu siiyaa jawi xor ka ah sigaar cabis dadka aan sigaar cabayaasha ahayn. dawladda Scotland, the Scottish Executive, waxay ka mamnuuceen sigaar cabis goobaha dadku isugu yimaado;
- > inaad dhaawacayn guriga iyo alaabta isla markaana aad u tixgelayso alaabta dadka kale si qadarin leh; iyo
- > shaqada guriga: inaad wax ka dhaqdo weelasha ama aad ka yeelayso in qolkaga uu hagaagsanaado.

Haddii ay jiraan xeerar aad u malaynayso inaysan caddaalad ahayn waa inaad u sheegtaa waxa aad ugu malaynayso qofk adiga ku taageeraya. Meel walba oo aad ku nooshahay waxaad arrintan kaga hadli kartaa kulanada dadka meesha deggan.

Dhammaan caruurta iyo dadka dhalinyarada ah waa inay cod ku leeyihiin xeerarka asaasiga ah. Haddii aadan raacin xeerarka asaasiga ah waxaad filii kartaa jawaab caddaalad ah waxaana la xakamayn (restrictions) la saari doonaa dhaqdhaqaaqyadaada.

Jebinta xeerarka (Breaking the rules)

Dadka adiga ku taageeraya waxaa haga Social Work Services³¹ waxa loo oggol yahay, aan loo ogolayn, inay sameeyaan haddii aad xeerarka jebiso. Mar walba ugu horaynta adiga ayay kaala xaajoon doonaan.



Waxyaalaha la oggol yahay:

- > shaqaale waa inu kula joogaa marka aad isticmaalayso lacagtaada pocket money²⁶;
- > lacagtaad pocket money²⁶ waa la hakin karaa illaa taariikh dambe;
- > waxaa kaloo lagu waydiin karaa inaad bixiso waxii dhaawac ah ee aad u gaysato guriga. Haddii ay tani in badan dhacdo waa inaad bixisaa lacagta laguugu leyahay waqti gudahiis;
- > waxaa lagu siin karaa shaqooyin ama hawlo aad samaynayso;
- > ma aad awoodi kartid inaad soo jeedo waqti dambe maalmaha fasaxa (weekend);
- > laguuma ogolaan karo inaad safarro aad iyo meelo si gaar ah laguugu casuumay.

Xaquuqahaaga (Your Rights) 05

Wax aad u sii xun ma aha – waxaad xaq u leedahay inaad naftaada u raaxayso sidoo kale! Waa in laguugu dhiirrigeliyaa inaad aragto saaxiibadaa, aad balwado yeelato hobbies¹⁸, aad samayso waxyaalaha aad xiisaynayso, aad qayb ka qaadato xarakaadyo aadna barato waxyaalo cusub. Lagaama filayo inaad u dhaqanto sidii qof wayn u dhaqmi lahaa marka waa in saamaxyo (allowances) laguugu sameeyaa haddii aad qaladaad samayso.

* Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Waxyaalaha aan la ogolayn:

- > dadka adiga ku taageeraya lama oggola inay ku dhaawacaan ama ku cabsigeliyaan adiga;
- > laguma samayn karo dhamman lacagtaad pocket money²⁶ ganaax/la hakiyo – waa in mar walba lagu siiyaa bar (half) lacagtaada pocket money²⁶ usbuuc walba gudahiisa;
- > waa inaan qol lagugu soo xirin [aan ka ahayn haddii aad ku jirto deegaan ammaankeedu sugan yahay (secure accommodation)];
- > lagaama goyn karo raashin ama laguma siin karo raashin kale ciqaab ahaan;
- > Dadka adiga ku taageeraya kuma dhihi karaan dhalinyarada kale inaysan adiga kula hadlin mana aha inay diidaan inay kula hadlaan ciqaab ahaan. (Tani ma aha inay la mid tahay qof ku waydiinaya inaad aamusto ama kulama hadlayaan illaa iyo inta aad ka joojinaysid u dhaarashadooda);
- > ma aha inay ku siraan dadka adiga ku taageeraya;
- > marna laguguma ciqaabi karo cararkaaga in lagu yiraahdo gasho dharka habeenkii iyadoo maalin lagu jiro; iyo
- > inaan lagaa qaadin kabahaaga aan ka ahayn haddii aad qof ku dhaawacayso.

Haddii aad xeerar ka jebisay meesha aad ku nooshahay kadibna lagugu sameeyay xakamayn, marka dadka adiga ku taageeray waa inay tan qoraan. Tani waa habka lagu hubinayo in caruurtaas dadkaas dhalinta yar loola dhaqmay si caddaalad ah. Social Work Services³¹ way eegaan diiwaanada si ay u hubiyaan in xakamaynta ay caddaalad tahay.

Haddii aad ku raacdo xakamaynta markaas dabeecadaada dambe waxay ahaanaysaa mid la soo yareeyay ama aan sii socon.

Haddii aadan ku raacin wax xakamayn ah waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato.

Xaquuqahaag (Your rights) 06

Waxaa ku saran masuuliyad sharciga gudahiisa inaad si fiican u dhaqanto isla markaana xaqiiqsato haddii aadan sidaa yeelin inaad khatar u tahay inay wax ku soo gaaraan.

Celinta (Restraint)

Celinta (Restraint) Dadka adiga ku taageeraya jir ahaan way ku celin karaan si ay u joojiyaan inaad qof kale dhaawacdo. Tan waxa la yiraahdaa ‘celin ama restraint’. Celinta waa in la isticmaalaa oo keliya marka la ilaalinayo ammaankaaga iyo ammaanka dadka kale. Haddii aad u baahan tahay in lage celiyo marka waa lagu qabanayaa laakiin laguma dhaawacayo.

Dadka adiga ku taageeraya waa in loo tababaray sidii ay ammaan ah kuu celin lahaayeen. Haddii lagu celiyay waa in foom la buuxiyaa sheegaya sababta. Waa in kadib lagu siiyaa fursad aad uga hadasho qof walba oo ku taxaluqayna waa fikradahooda foom lagu diiwaangeliyaa. Dadka waa ay ka hadli karaan inaad ahayd mid “si ammaan ah loo qabtey”.

Haddii lagu celiyay aadna ku raacsanayn sida celinta ay u dhacday, ama aad dareemayso inaanan si sax ah loo samayn, waxaad arrintan kala hadli kartaa qof.

“

Waxaa i soo maray markaan ugu horayntii halkkan imid, sababtan darteed waxaa ahaa cidlo sidoo kale ma garanayn luqada. Markii aan helay dad iga taxadara aniga, waxaan bilaabay inaan iyaga barto kadibna waxaan dareemay fiicnaan. – Ali

”

* Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Xaquuqdaada inaad cabasho samayso (Your right to complain)


Waxaad u leedahay xaq inaad ka cabato adeeg WALBA oo aad helayso.

Haddii ay ku haysato dhibaato sida laguu xanaaneeyay, waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato arrintan qof walbana waxaa saaran masuuliyada inuu cabashadaada u qaato mid aan ciyaar ahayn.

Waa inaad tan marka hore kala hadashaa dadka adiga ku taageeraya. Waxay isku dayayaan inay xalliyaan ama kula xiriirsiiyaan qof ku caawin kara.

Haddii ay adag tahay in lala xiriiro, ama aad la hadasho dadka adiga ku taageeraya, ama aad qof la hadashay laakiin aan dhibaataadii la xallin waxaad la xiriiri kartaa adeegyada ku qoran Tusaha cinwaanada ee xirmadan.

Foomamka cabashooyinka waa inay xor ah u heli karaan dhammaan caruurta iyo daka dhalinyarada ah ee la xanaanaynayo – waydii shaqaalaha deegaanka foomkaas. Ha welwelin haddii aadan foomka helin, ama aadan jeclayn inaad wax qortio, waad ku samayn kartaa cabashada telefoon ahaan, eeg akhbaarta ku saabsan qaybta Glasgow City Council Complaints ee gudaha **Tusaha cinwaanada**.



“

**Glasgow waa meel fiican ee lagu noolaado.
Dadka Scottishka waa dad aad saaxiib u ah, fiican
ayna fududahay in waxyaalo lagala xaajoodo.
Hadda waxaan dareemayaa farxad iyo inaan aad
ugu qanacsanahay ku noolaanshaha gudaha
Glasgow. – Miriam**

”

La xiriirista Adeegyada Shaqada Bulshada habeenadii iyo maalmaha nasashada (Contacting Social Work Services in the evening and at weekends)

Xasuuso haddii aad u baahan tahay inaad la xiriirto qofkaaga Social Worker³⁰ wax ka baxsan saacadaha shaqada waxa waci kartaa kooxda diyaarka ah (standby team). Tani waa koox Social Work Services³¹ ee ka jawaabaya telefoonkaaga habeenkii iyo maalmaha nasashada marka xafiiiska degaankaaga Social Work Services³¹ uu xiran yahay. Arag Tusaha cinwaanada waxii faahfaahin ah. Waad waci kartaa social worker³⁰ ee diyaarka ah adigoo **wacaya telefoonka lacag la'aanta ah ee 0800 811 505 (Glasgow)**.



Waxyaalaha muhiimka ay tahay in la xasuusto marka aad cabasho samaynayo

Waxad xaq u leedahay inad cabasho samayso si sir ah, in cabashadaada loo qaato mid adag, aadna jawaab ka hesho cabashadaada.

Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta aad ka heshay cabashadaadii ama habka cabashadaadii loola macaamilooday, waxaad xaq u leedahay inaad codsato in tan mar kale dib loo eego (foomka cabashada baa wax dheeraad ah kuu sheegaya ama waxaad la xiriiri kartaa Children's Rights Service, ee **Tusaha cinwaanada** waxii faahfaahin ah).

* Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Dhammaan cabshooyinka oo idil waa inuu baaraa qof aanan ku taxaluqin xaalada aad ka cabatey.

Marka aad cabasho samayso marna ha dareemin in lagugu cabsi geliyay oo khasbey inaad cabato. Haddii aad dareento inay sidan tahay waad ka samayn kartaa cabasho kale tan.

Haddii aad u sheegto akhbaar qofka adiga kula shaqaynaya la micno noqon karta in adiga ama caruurta ama dadka dhalinyarada kale aad khatar ugu jirtaan dhibaato, marka tan waxaa loo baarayaa si ka duwan. Waxaa lagu siin doonaa fursadda aad arrintan uga hadasho waxaana lagu siin doonaa sharraxaad waxa soo socda ee dhici doona. Akhbaarta aad sheegto waxaa loo xafidi doonaa sida ugu suurto galsan ee gaarka ah mar walbana waxaad ahaanaysaa mid lala socodsiiyay waxa dhacaya.

